Ururka Dimograadiga Haweenka Soomaaliyeed

# HORUMARKA HAWEENKA




8da Maarso 1990

## HORUDHAC

*Buuggan yar ee sheekada aan ka dhignay si akhristuhu ama akhrisatadu u macaansato,sidaad magacisaba ka garan doontaan, wuxuu ku saabsan yahay la dagaallanka caadada foosha xun ee gudniinka.*

*Caadadaas oo ka soo horjeedda Kalaankii Ilaahey ee Quraanka Kariimka iyo xadiisyadii N.N.K.H. Buuggaan oo aannaan si faahfaahsan ugu hadlin arrintaas, hase yeeshe aan ku talo jirno inuu noqdo tallaabo toosan oo taxane noqota, wuxuu nagu baraarujinayaa in Ebbe, Suubbane, Sarreeye uu markuu aadanaha abuuray uu u abuuray si dhan oo qurxoon, uuna ku sheegay misxafka kariimka ah. Nebigeennilna Maxamed Ibnu Cabdillaahi Ibnu Muddalib iyo asaxaabtii ka soo werisay xadiis-yadiisii ay sheegeen in Ilaahey uusan cad xaaraan ah khilqadda ama abuurista aadanaha ku darin.*

*Sida awgeed waalidiinta waa inay ku cibro qaataan Quraanka,axaadiista Nebigeenna N.N.K.H., asxaabtii xadiisyada saxiixa ah oy ka soo weriyeen Nebigeennii iyo culimadii fiqiga ee hore iyo kuwa casrigan. Waxaa Nebigeennii N.N.K.H. nagu boorrinayaa inaannaan gabdhaha caddaabin, cadaabid-daaso ah gudniinka, maxaa yeelay gudniinku waa cad xalaal ah oo laga jarayo jirkeedii wax u dhimaya, naagnnimadeediina dhimaya. Akhlaaqda wanaagsani sida Suubbanahuu leeyahay kuma jirto gudniinka, balse akhlaaqdeeda oo la wanaajiyo, tarbiyad fiican oo la siiyo, waddada toosan oo loo tilmaamo, naxariis la tuso, waxna la baro. Caadada gudniinku aad bay u foolxun tahay, dheddig badanna dhibaatooyin ayay kala kulmeen habeennadii u horreysay ee gurigeyntooda.*

*Ragga qudhiisa ayaa gudniinka iyo tolidda gabadhu dhib u keenaa oo muddo badan ay qaadataa ka jiba "gaariddeeda" . Maxaa yeelay waxa dhacda in*

*Gobollada qaarkood ay reer miyigu seyn faras ku tolaan gabdhaha markey gudaan, markaas ninku markuu bikro jabin waayo ragannimadiisa wax laga sheego.*

*Gudniinku wax weyn ayuu u dhibaa dheddigga, waayoo muddo dheer ayaa intay ka soo "kaakaceyso" ka qaadataa ninku durbadiibaa, waa ninka aan si fiican u garan xaaladda dheddigga gudan, markuu " gaaro" ayuu dhinac isku tuuraa.*

*Arrintaasu waxay dheddigga qaarkiis ku dhalisaa tuhun ay is tuhunto inay " baarid" tahay oysan maqsuudin karin ninkeeda. Xaaladdaasu haweeneydu waxay ku reebtaa welwel,iyo feker naf-saani ah. Xitaa Yurub waxaa ka dhaca in ragga qaarkii durbadiiba taabashada u horreysa uu "gaaro" dantiisa. Hadduu waxgarad yahayna uu garto baahida afadiisa iyo aadaminnimadeeda, sugana intay ka "gaarto" waxaase dhacda in ragga Yurub qaarkood aysan caadifadda haweeneyda daneyn, hase yeeshe maadaama haweenka Yurub ay badidood wax yaqaannaan, ama akhristaan arrimo ku saabsan dheddigga iyo labka, takhaatiir ayay arrintaas kala tashtaan . Haddii arrintu haweyneyda ku saabsan tahay takhtarka takhasuska ku leh ayay kala tashataa, waanooyin iwm ayuuna siiya, sidoo kale labka.*

*Hase yeeshee dheddiggayagu way ka xishoodaan arrintaas, xita raggaa qaarkood. Sababta ugu weynina waa jahliga oo Eebbe Quraanka Kariimka ah ku yiri: Nebiyow ku dheh ummaaddaada:( Isku mid ma noqon karaan qoon wax yaqaan iyo qoon aan wax aqoon) waa maya. Sidaa awgeed ayaa Nebigeennii N.N.K.H.uu u yiri, akhlaaqda iyo asluubta hagaagsani kuma jirto gudniinka dheddigga balse korriimadooda hagaagsan,waxbariddooda,u naxariisashadooda,dhegeysiga waxaa ay sheganayaan iyo tixgelinta ra'yigooda hadduu toosan yahay. Gudniinka aad bay haweenku dhib ugala kulmaan, gaar ahaan marka ay xaamilo noqdaan iyagoo ah ugub , geeri badanna way sababtaa, sababtoo ah haweneyda wax gudeysa oo gudaha " daloolka" haweyneyda dhibaatooyin u geysata. Qaarkood way ba geeriyoodaan isla markii la gudo, sababtoo ah iyadoon daawo teetano lagu mudin, middiyo mirir ah lagu qalo, alkolo aan lagu nadiifin "infection" ku dhaco waa kuwa aan isbitaalka la geyn .*



*Sida awgeed hadal keygii waxaan ku soo koobayaa innagoo diinteenna aad u dhuuxna, kana faa'iideysanna culimada ku xeeldheer diinta, kana fogaanna ku tiri ku teenta Kitaab gaabiowga iyo caadaadka gaaboobay ee ku saabsan gudniinka oo kutubbaha Samaawiga ah, oo dhammi ay ka digeen ku dhaqankooda.*

*Waxaa waajib diini ah in qof kastoo akhriista buuggan inuu uu gaarsiiyo inta awooddiisa ah cid allaale ciddii uu la kulmo, waalidiinta gaar ahaan Baaq waxaan u jeedinayaa qof kastoo muslim ah ee Soomaali ah inuu la dagaalo caadadan xun ee gudniinka oo gabdhahooda wax u dhimeysa bilowga noloshooda. Soomaali kasta ee aqoonyahan ah, diini ah,siyaasi ah, waa ka mas' uul inuu cudurkan ama dembigan laga galayo dheddigga wixii aqoontiisu gaarsiiso ka geysto xag ilaahey ayuuna mas'uul uga yahay. Waxaan halkan mahad ugu soo jeedinayaa aqoonyahannada Talyaaniga ah ee arrintan isaaniga ah gacanta nagu siiya iyo aqoonyahanada iyo dhaliiyarada Soomaaliyeed ee habeen iyo maalin Ururka dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, kuwaaso dhab ahaantii aan mahad naq naga rabin, balse noola shaqeeya ruux islaannimo, waddninnimo iyo isaaninnimo.*

*Xildhibaan Muraayo Garaad Axmed*
*Guddoomiyaha U.D.H.S.*



# SAS!!



*Waa teynu godol hore, jacaylkeeni gaamuray;*
*arrin wada gorfeynay ku heshiinnay guur wacan*
*go'aankii nikaaxiyo gunti aqal galkeennaba;*
*Faarax maysla garannaa waa goorma gacalow.*



Faarax waa nin geesi ah, fulayba gidaade: weligi dib uma guran. Hadal waxay ku gaareen galabnimo Khamiiseed bishu15ka tahay inay aqal galayaan, waqtigaa ku gaabtayo goorta waxaa dhimman 3 Maalin gudahood.






Qoyskooda gaarka ah, saaxibbo gooniya, intay gacal wadaageen, gurboodkiyo, haweenkii gelbiski arooska iyo farxaddi ka qeyb galeen, waa aqal guulle, guurkii la wada geeyay.



Caasho,Faarax waxay tiri: waa la faanshey guurkee kama fiirsan xaajada. Waa mashaakil fara badan, fajac iyo dhibaatiyo, dhaawac baan la fara galay.





Caasho waxaa soo booqatay Farxiyo, isla intii ay arooska ku jirtay, waxay ka garatay in dhibaato haysato. Haddadba guursataye ma isafgaran waaba idinku dhacay adiga iyo saygaaga?.



*Caasho waxay ku jawaabtay : silic iyo xanuun, saxariir hurguma leh, saableyda tarantiyo,saxaaxiba iga galay, guurku cudur miyuu sidey, ma saatanuu ahaan jiray, safkii iga horreyiyow dumarku se ku noolaa?.*
*Seddex beri ma aan kicin, socodkiiba waan gabay sariirtaan duljiifaa, haweenku saan ma wada maray?.*





*Saaxiibeey, dumarku **waa** sarriigtaan, sarqan iyo dhaqaaqiyo, oohin **lama** salooshaan, waa inaad si deg deg **ah u** addaa takhaatiirta haweenka ku shaqa leh, **ood la** tashatid.*



Caasho waxay u timid takhtarad Xaawo, iyadoo ku leh saddex maalmood keliya anoo guri leh, galmadi xanuun badan bay xubnaha taranka ee gudaha ii keentay.





Takhtaraddii waxay tiri:
xannuunkii ku gaaray, dhaawacii gudniinka, faruuryihii la gooyay,saxaaxa qodobkii lagu tolaa, dhibabaatooyin gaystay,galmadii halistan kugu ridday.

Sahal yaanay kula noqon, sariirtan cisbitaalka ah, muddo seexo gabarey, daawo aan ku siiyee.



*Caasho markay caafimaad heshay, kaddib waxay isku aragtay jirro, labbo-labbo iyo hunqaaco.*





***Faarxiyo, oo Caasho soo booqatay ayaa garatay astaamihii jirrada. Caasho ha welwelin walaalay nasiibkaagu wacanaa, waa wallac iyo xanuun fudud uur baad yeelatay waad dhali doonta.***



*Caasho: uurka aad sheegaysid waa maxay? markii aan xusuusto dhibaatooyinkii aan la kulmay, galmadii, Faaraxii aan jeclaa wuxuu iigu muuqdaa sida bahal oo kale.*






*Caasho markay seedkii uurka dhammaysatay kaddib waxay dhashay gabar Fowsiya loo baxshay,iyadoo fooshiina xanuun badan la kulantay (eedaadka foosha ah ummulba illawdee).*
*Caasho iyo Faarax jaceylkoodi waa soo cusboonaaday .*



*Fowsiya markii ay 8 Jirsatay ayaa labadeedii ayeeyo waxay go'aansadeen in la gudo.*





*Caasho way ka gubatay oo go'aankoodii lama dhicin guumaarkii i xanuunay,dhaawacii galmadii hore; sakiintii laygu gooyiyo, fooshii geerida ahayd; gabadhayda lama rabo.*



Ayeeyooyinka arrintii ma oggolaan, iyagoo ku andacoonaya: waa in la xalaaleyaa, xaraanta laga jara.






Caasho waxay ku tiri hooyadeed iyo soddohdeed: gudniinka sideed u gareteen?



Ayeeyooyinkii waxay dhaheen kintirka gebi ahaantiis, bushimaha geesohooda ah, giddi waa la goyaa, tolmo lagu dhex giijaa god yar oo dalool ah oo kaadidu ka gudubtaa gabadha loo sameeyaa.





Caasho waxay iskugu yeertay guddi ka kooban labada Ayeeyo, soddogeed, Faarax,Takhtar, Shiik diinta ku xeeldheer.



Caasho, waxay Shiikha waydiisay Diintu gudniinka waxay ka qabto. Shiikha wuxuu ku jawaabay: gabdhahu waa xalaalo cad xaraani kuma yaalo, Xadiiskiyo, Quraankaba, waa lagu xushmeeya. Gudniinku waa xaddidanyahay, Xeerkii Nebigu sheegiyo Sunnahaynu xigannaa.
Suuradaha Quraanka ah Sadar laguma sheegine Sunne weeye xaajadu. Suubanow Nebigeenni Xadiiskiisa saxa ah, Umucaatiya wax su'aalay, gabdhaha say u gudaysiyo, sifayaasha u sheegay Seedaha kintirka, bushimahooda ha saafin, dareenku yuu ka salguurin. Sakiinta caaradda saar; sarmo yar dhiigga kaga keen; saddex dhibcood ha ahaato ama vev sabca dhaafin.





Takhtaraddii ayadana markii wax laga waydiiyey gudniinka waxay tiri: dhibaatada sababteeda sugan iyo saldhiggeedu wuxuu yahay: kintir seedda laga jaray, bushimaha la saafoo la sal guurshay hilibkii; tolma lagu sig-saago.
Bigradi saxa ahayd oo Rabbigay sameeyey halkii bay sallaxan tahay. Caadada sillooniyo, maqaarka saynta lagu tolay; sahal looma gooyee, sakiin marbay ku jeexaan. Gudniinka Fircooniga waa dhaqan gaboobay dunidu way ka gudubtaye; gabashaada haw gudan. Galmada dhawaceeda, hurgumada gumaarka ah; teetano is garabsada geeri baad ku sigataa.



*Ayeeyooyinkii waa u riyaqeen taladii Takhtaradda iyo Shiikha Culuma'udiinta ahaa:*
*Illey jaahwareerkii,*
*Hilibkii la jarayiyo,*
*Tolamo Diinta kuma jirin.*
*Jinni baa na duufsaday.*
*Jidka toosan nagu wada,*
*Waa in aan jihaadnaa,*
*Gudniinkaas la joojaa.*





*Caasho ayadoo u riyaaqday talada la wada fahmay waxay ku buraamburtay:*
*Adduunku haddaan haween joogin haybad ma leh.*
*Waa hoggaankii taranta hoygu abuurku galo.*
*Habeen iyo maalin uurjif nafaqo ka helo.*
*Hilibka dhalashada habliyo, wiilal hooyadood .*
*Horaadka caanaha leh tan habeysa had iyo jeer*
*Hadaaqa af baradka barihii higaadin jiray*
*oo hadalka buuxiyo oraahdoo dhan laga helaa.*
*Waa hogol da'ayso xaredeedi laga hirqaday.*
*Hobaal miraha iyo ubaxii ku heeran yahay.*
*ee war yaan la halleynin hilbahooda hawlgalka ah.*

## ARAGTIDA ISLAAMKA EE GUDNIINKA DHEDDIGA

1-Horudhac meesha gabadhu kaga jirto Islaanka. Haweeyneydu markii si gaar ah loo eego Islaanka waxay ku leedahay meel wanaagsan iyo meeqaan weyn, waxana weeye walaashii labka ama ninka,Ilaaheyna Suubbane Sarreeye ninka oo keliya nolosha uma uumin haweeneydoo keliyana uma uumin, balse waa lab nafley ah ama ruux oo sharicada Islaanka ku kulmay,waxayna noqdeen nin iyo ooridiis, labadaa is qaba iyo awlaaddooda ayaana qoysku ka sameysmay. Qoyskuna waa unuggii u horreeyay ee bulshada. Eebbe, Suubbane, Sarreeye wuxuu yiri: "Shey walbaba laba dheddig iyo lab ah ayaan ka abuurnay si aad wax u ogaataan". Qoysku aasas ahaan seddex qodob ayuu ku tiirsan yahay, si nolol wanaagsani ugu suurogasho, labada is qabaana nolol heshiis iyo baraare ah ku wada noolaadaan.

**AASAASKA KOOWAAD:**
Hoyga,qof walboo iyaga ka mid ahina wuxuu la deggan yahay qofka kale, kaasoo macneheedu yahay inuu ku nool yahay garabkiisa isagoo amni tebaya, degganaan iyo nabadgeliyo.

**AASAASKA LABAAD:**
Jacaylka,taasoo macneheedu yahay in qof walboo labadooda ka mid ahi uu jeclaado qofka kale,si guriga guurka uu u hareeyso una buuxiso raallinnimo iyo nolol rajo wanaagsan laga qabo iyo deggenaan.

**AASAASKA SADDEXAAD:**
Naxariista, inay isku naxariistaan, uusan qofna qof kaleku qallafsanaan. Aasaasyadaan ama qodobbadaas, waxaa kulmisay aayad ka mid ah kitaabka Rabbigeen oo yiri: " Waxaa ka mid ah aayadihiisa in uu idiinkaga abuuray nafihiinna dheddig iyo lab isqaba si aad u degtaan, wuxuuna idiin yeelay is jacayl iyo raxmad"



Guurku wuxuu leeyahay miro iyo awlaad. Maxaa yeelay awlaaddeennu waa nolosheenna oo sii fideysa, waana sirta wanaaggeennu ku jirto, sidaa awgeed ayaa waxaa ka mid ahaa ducada dadka saalixiinta ah,una ah Rabbigood waxa Quraanka uu ka sheegay oo ah qowlkii Ilaahey: " Kuwaas oranaya Rabbigeenow naga sii oryeeheenna iyo carruurteenna wax indhaha u qurxoon" Islaanka wuxuu karaameeyay gabadha gaar ahaan maxaa yeelay maanta iyadu waa gabar, berrina waa oori, kaddibna waa hooyo. Xadiiska shariifka ah oo laga soo weriyay Nebigeenna N.N.K. ha ahaatee ( Jannadu waxay ku jirtaa cagaha hooyooyinka hoostooda ) waxaa ka mid ahaa oo kale in Islaanku karaameeyey haweeneyda inuu ku xusay toban suuradood oo ka mid ah suuradaha Quraanka Kariimka ah, laba suuradoodoo ka mid ahna: Suuraddii haweenka ee Weyneyd, waana midda Quraanku ku jirto oo ah Suuradda afraad iyo Suuradda Haweenka ee yar, waxaana lagu magacaabaa Suuradda Isfuriinka.
Gabadhu waxay leedahay makaanad weyn oy ku leedahay qoyska. Rasuulka Ilaahey wuxuu ku boorriyay dadka inay daryeelaan, wuxuuna arrintaan ka leeyahay: " Qofkii gabdhahaas wax looga baleeyo, oo markaas u ixsaan fala, waxay u noqdaan gaashaan naarta ka celiya" Ixsaankaas macnihiisu waxa weeye korriimadooda oo la hagaajiyo, tarbiyadooda, iyagoon la dhibin jir ahaan iyo saykolooji ahaan. Xadiis kalana wuxuu ku leeyahay: ( Qofkii dhalay qof laba ah oon iyadoo nool diiin, wax karaamadeeda wax u dhibayana aan ku sameyn, oon wiilkiisa ka jeclaan Ilaahey jannaduu geliyaa ).

## 2-GABADHA OO LA DHIBIN

Mar haddii gabdhuhu makaanaddaas leeyihiin xagga Islaanku, sideebey marka ugu dhici karaan waalidku inay kadeedaan iyagoo ka goynayo cad ka mid ah jirkooda iyadoon cudur heyn ama wax wax u dhimaya? Taasoo ah gudniinka. Haddii ay suurtowdo in wiilka la gudo yacni " Buuryada" laga gooyo, meeshaasoo wasakh ama haraa ku haro jeermi dhaliya, urna sabab u noqota, maxaa gabadha oon waxba gudniinku dhib mooyee,u keeneyn loo gudayaa.

Ray'uga takhaatiirta ayaan ereygaa u cuskannay. Hase yeeshe waxba haweenka kama aysan oran oo dhib ah oo ka soo gaaraya goynta cadka laga gooyo "Kintirka" . Ra'yiga takhaatiirtu ixtiraamkiisa ayuu leeyahay, maxaa yeelay ra'yigiisa waan qaadannaa hadduu na yiraahdo haweeneydu waa xaamilo, ama inayan naasnuujisadu soomin bisha Ramadaan haddii ay isu baqdo, amise ilmaha ay siddo u baqdo, ama key nuujineyso. Bisha Ramadaan way afureysaa, waxayna qalleyneysaa markii sababtu ka tagto. Ra'yiga takhtarku wuxuu leeyahay xurmadiisa xagga diinta Islaanku.

## 3-DIINTU MAXAY KA QABTAA GUDNIINKA?

Haddii gudniinku ragga u fican yahay xagga caafimaadka, haddana si loo garto markii lagu dilo isagoo dagaal kula jiro cadowga wadanka, si loogu tukado, looguna aaso qabuuraha Islaanka. Marka ma loo doonayaa dheddigga in la gudo? Waxaa la ogyahay in ilaha " Risorse" sharIicadda Islaanku ay tahay afar: Quraanka, Sunnada, Iskuraacida " Ijmaac" iyo qiyaasta. Quraankase kuma jiro nas, yacni hadal caddeynaya arritaas, inkastuu arrimaha haweenka ka xusay wax badan sida markey xaamilada tahay, markey dhasho, markey naas nuujineyso, furriinka, caadada iyo dhiigga dhalmada la socda iwm.



Isha labaad oo ah Sunnada qawlkii Rasuulka N.N.K. ha ahaate, ficiiladiisii iyo warbixinnadiisii, maxaan marka ka kororsaneynnaa xadiisyada Nebiga N.N.K. ha ahaate. Dhammaan wixii loo nisbeeyay Nebiga N.N.K.ha ahaate lama oran karo waa wada sax,waxaana ka mid ah xadiiska ah :" Qofkii muslima ha la gudo" iyo xadiisyo kale,waxaa jiroo kale xadiis laga soo weriyay Nebiga oo la yiri inuu sheegay in uu ku yiri haweeney gabdhaha gudi jirtay:" haddii aad guddid ha ku talax tagin, yacni "Kintirka" ha jarin, maxaa yeelay sidaa ayaa u wanaagsan haweenka, labkuna jecel yahay" Xadiisyadanu culimadu waxay ka yiraahdeen: in meelaha ay cuskan yihiin ama laga helay aysan sugnayn. Sidaa awgeed ayaa culimada qaarkood u yiraahdeen: " gudniinku kheyr kuma jiro iyo sunno la raaco" Sidaa awgeeed haddii aan niraahno ama maloynno in xadiisyadaasu sax yihiin, ma ka heleynnaa amar ka soo fulay Nebiga N.N.K.H. oo faraya gudniinka haweenka, amase farriin gaar ah oo banneyneysa gudniinku?

Markii Nebigu ka hadlay gudniinka haweenka, wuxuu farayey xadiiskiisu wuxuu ahaa waano uu haweenka wax guda xadiiskiisu wuxuu ahaa farriin u barayay inay haweeneydaasu u naxariisataa gabadha ay gudeyso, cad yar oo darafka sare ahna ka goyso,oo kaasu waa mawqifka Quraanka sunnada Nebiga ee ku saabsan gudniinka dheddigga, maxaa yeelay kuma jirto wax gudniinka gabdhaha sunno ka dhigaa.

Rasuulku afar gabdhood ayuu lahaa, mana beddelin siiraddooda ama abuuristooda, yacni ma gudin. Sidaa awgeed ayaan u aragna ama ay jiraan dowlado islaan ah oo fara badan oo sharIicadda aad ugu dheggan, gabdhahoodana aan gudin sida Sacuudiga, Ciraaq, Iraan, Shaam, Liibiya iyo Maraakish.

Culimada Islaanku ee ku xeel dheer fiqiga Islaanka waxay isku khilaafeen xukunka gudniinka iyagoo raacaya inta saxani qawl cad ee sax ah. Kaddib

markii uu Sheekhii As-har Maxamuud Shaltuut uu ka dooday hadalladii la is dhaafsanayay ee kala duwanaa: Shariicadda Islaamku waxay goyneysaa ama caddeyneysaa mabda' guud oo ah goorta ay ku sugnaato hab baaritaan ee aad u qoto dheer in shey ama fal uu ku jiro dhib ama fasaadin, mar haddiina dhibkii sugmay,oo dhibkaas ugu fudud yahay jirka oo wax la gaarsiiyo gudniinka gabadhu waajib maaha iyo sunno toona. Ustaad Sheekh Sayid oo ka mid ah culimada casrigan wuxuu leeyahay: " Gudniinku waajib kuma aha gabadha, haddii la iska daayana dembi maaha, laguma arag Kitaabka Ilaahey iyo sunnada Rasuulka N.N.K.H. wax sugaya ina gudniinku khasab yahay, wixii arrintaas ku saabsan oo gudidda gabdhaha ee Rasuulka laga sheegay war hadal liciif ah oon waxba ka rumoobin, laguna kalsoonaan karin. Ibnu Mundir wuxuu yiri oo ka mid culimada waaweyn ee fiqhiga cusub. ( gudniinka kheyr kuma jiro iyo sunno la raaco, waxaana jira xadiiskiisii Rasuulka ee Ummucadiya Al-Ansaariyah) khafiifi oo ha ku talax tagin, waana xadiis liciif ah iyo xadiisyo kaloo liciif ah

## 4-GABDHAHA YAR OO LABADEEDA WAALID INAY GUDAAN DOONAYAAN.

haddii ay awood u yeelan lahayd inay wax cabbirto way ku qaylin lahayd oo waxay ku oran lahayd: I daaya oo ha I cadaabina.

Islaanku wuu reebay cadaabidda, Rasuulkuna wuxuu yiri" Qofkii qof muslin ah dhiba wuu i dhibay, qofkii i dhibana Ilaah buu dhibay" Ii daaya dabeecadeyda dheddignimo oo Ebbe ii abuuray hana i dhibina caafimaad ahaan, saykolooji ahaan iyo bulsho ahaaney gabadhu. Ilaahe wuxuu leeyahahay:

"Banii-aadanka waxaan u abuurnay abuuris ta ugu wanaadsan. Hadalkeyga waxaan u soo jeedinayaa dhammaan walaalehey Islaanka ah dhul kasta joogaan inay ka tagaan caadada wax dhibaysa oo ah gudniinka dheddigga. So inayan dhibin gabdhohooda maaha;



kuwaasoo maraya nolosha bilowgeedii, arrintaasna khilaaf diinta ah kuma jiro oo Ilaahey na faray oo kheyr iyo wanaag ku jiro. " Haddey sameyn lahaayeen waxa lagu waaninayo kheyr buu u ahaan lahaa sugnaanna ugu adkaan lahaa, markaas dhinaceenna ajar weyn baan ka siin lahayn, waddo toosanna ku hannuunin lahayn" .

Ilaah run buu sheegay waxaa dhigay
baaritaanka fadiilat Al-Sheekh
Cabduraxmaan Al-Najaar oo ka mid
ah culimada As-har ee Wasaaradda
Awqaafta Masar.

# MAHADNAQ

*Munaasabadaan 8da Maarso,maalinta haweenka adduunka, Ururka Dimoqraadiga Haweenka Soomaaliyeed, wuxuu mahad gaar ah u celinayaa Ururka Talyaaniga ee Horumarinta Haweenka ( AIDOS ) oo iskaashi naga dhexeeyo gacan naga siiyay iyo taagreeraba, soo saaridda buugaan yar, sidoo kale L'UDI DI MARCON ( Prov. di Venezia ) waxaan kaloo mahad u celineynaa Hay'aadaha soo socda ee Talyaaniga ah ee Soomaaliya ka shaqeya kuwaasoo gacansiintoodiina noo surogelisay daabacaadda buuggan, waana kuwan: AGIP, COIPA, DELMA, FIAT-IVECO, LINEE MESSINA, SOIMI, SOMALFRUIT, TECHINT.*